Northwards Housing
North Manchester's Council Homes
www.northwardshousing.co.uk

ka qaybqaadashada deganaha

Heshiiska Ka qaybqaadaashada Deganaha

Khulaaso

العربية 中文 فارسی हिन्दी کوردی اُردو Việt - Nam

Waxaa laheli kara daabac waaweyn, qoraalka indhoolayaasha iyo cajal ahaan

Français	Somali

Horudhac

Deganeyaasha waa wadnaha waxkasta oo aan samayno. Waxaynu rabnaa inaanu hubino inaau kaala tashano, ra'yigiigina aan dhegeysano iyo inaynu bixino fursadaha aad lug ku lahaan karto qaabeynta iyo horumarinta adeegyada aynu bixino. Heshiiska Ka qayb qaadaanshada Deganaha waxay muujisaa sida arintani aynu u samayn doono. Khulaasadan hadafkeedu waa inay bixiso waxyaabo kooban oo guud ahaan ku saabsan heshiska.

Haddii aad dooneysid inaad aragto heshiiska qaybteed buuxa eeg w.northwardshousing.co.uk ama la xariir Kooxda Ka qaybqaadashada Deganaha telefon **0161 227 3040.**

T8240-Somali Resident involment summary

Ku saabsan Guriyeynta Northwards

Guriyeynta Northwards waa 'urur leh maamul qoto dheer' – ama ALMO – oo la wareegtay maamulida, dhowrida iyo horumarinta 13,000 guryaha golaha deegaanga ee koonfurta Manchester bisha December 2005 gudaheed. Inkastoo ay guriyeynta Northwards ay maamusho gurigaaga, weli waxaad sii tahay kireyste kaanwsil, milkiilaha gurigaagana uu yahay kaawnsilka Golaha Deegaanka magaalada Manchester..

Maxay tahay Heshiiska Ka qayb qaadashada Deganaha?

Waa heshiis u dhaxeeya milkiilaha iyo deganeyaasha oo ku saabsan sida ay si wadajir ahaan u shaqayn karaan inay wax saameeyaan haddana qaabeeyaan adeegyada milkiilaha. Waxay qeexdaa sida aad ka qaybqaadan karto go'aan-samaynta, damaansadaan balanqaadka Guriyeynta Northwards in deganeyaasha ka qaybqaadaan, haddana soo saaraan heerarka aan samayn doono.

Deganeyaasha mutadawiciinta iyo Guryeynta Northwards si wadajir ahaan soo saaraan heshiiska.

Markaan ‘deganeyaasha’, waxaan ula jeednaa:

- Kireysteyaasa Guriyeynta
- Northwards
- Heshis hayeyasha Guriyeynta
- Northwards qofkasta kale degan
- deegaanka Northwards ama nidaamka guryaha dadka la daryeelo
- Xubnaha guddiga ururada maamulka.

Heerarka ka qayb qaadashada iyo taageerka

Dowlada waxay samaysay habooyin badan oo ay ka fakarayso inaad ka qaybqaadato howlaha milkiilaha gurigaaga – kuwani waxaa loo yaqaana heeraka rasmiga. Si heerarkani loo fuliyo Heshiiska Ka qayb qaadashada Deganaha waxay sharaxdaa:

- fursdaha aad qayb ka qaadanayso ee go’aamaha saameyn ku leh gurigaaga iyo jaaliyadaada
- heerka adeega aad naga filan karto haddii aad dooneysid inaad ka qayb qaadato

waxyaalaha la heli karo deganeyaasha inay ka qayb qaadaan, oo ku jira deeq lacag iyo tababarka kireystaha iyo kooxda deganeyaasha

adeega aad naga filan karto haddii aad wax dacwo aad leedahay

sida aynu dabagal ku samayn doono iyo dibueegida heshiiska iyo sida deganeyaasha ay arintani ka qayb qaadan doonaan.

Sida Guriyeynta Northwards go'aan samayso iyo aad ka qayb qaadan karto

Guriyeynta Northwards waxay leedahay guddi ka kooban afar kireyste, afar xubnood soo magacaabeen Golaha deegaanka iyo afar xubnood oo madaxbanaan. Guddiga waxay sameeyaan go'aamada iyo qorshooyinka Northwards, waxay dhigtaa ujeedadeeda balaaran iyo bartilmaamo, waxayna xaqiijisaa in shaqaalaha ay fulinayaan heerarka adeega iyo horumarinta.

Guddiga waqtigan waxay kulmaan bil kasta. Haddii aad dooneysid inaad timaado kulanka guddiga fadlan la xariir Kooxda Ka qayb qaadashada Deganaha oo kuu habayn doonaan. Waxaad dhamaan faafaahinta iyo ajeendooyinka kulamada guddiga ka heli kartaa websaaydka www.northwardshousing.co.uk, ama la xariir Kooxda Ka qayb qaadasha Deganaha **0161 227 3040.**

Samaynta Go’aamaha heer deegaaneed

Guriyeynta Northwards waxay haysaa 13,000 guri oo daboola deegaan balaaran. Hase ahaatee waxay ku dhowrtaa xiriirkeeda adag ee deegaanka habka sadexdeeda 'guddiyada deegaanka'. Guddi kasta wuxuu leeyahay todoba deganeyaal Northwards, labo milkiile, hal heshiis kiro haayste, iyo hal xubin oo ka socda maamulka deegaanaheeda mid kasta. Guddiyada waxay kala yihiin:

- Wilton: deegaanada Higher Blackley, Crumpsall, iyo Cheetham
- Fourways: deegaanada Charlestown iyo Moston
- Riverways: deeganada Harpurhey, Newton Heath iyo Miles Platting iyo Ancoats iyo Clayton.

Guddiyada deegaanka maxay sameeyaan?

Guddiyada waxay bixiyaan jawaab celin ku saabsna adeega guriyeynta deegaankooda waxayna ku cabiraan baahida iyo ra’yiga jaaliyadaha deeganka. Waxay ka faaleeyaan qorshooyinka, waxay fiiriyaan adeegyada la bixiyey waxayna talo usoo jeediyaan xubnaha rasmiga ee Northwards. Iyagana sidoo kale waxay sheegaan mudnaanshaha nidaamyada horumarinta.

Waad ku soo dheweysan tahay kulamada guddiga, waxaadna codsan karta inaad kulanka ka hadasho. Booska waa xadidan tahay, haddaba la xariir Kooxda Ka qayb qaadashada Deganaha si aad boos u diwaangeliso **0161 227 3040**.

Khiyaarooyinka

Ka qayb qaadashada

Guriyeynta Northwards balanqaad keedu waa inay kaala qayb qaado go'aamaha saameyn ku leh gurigaaga iyo deegaanka aad ku nooshahay.

Hadii aad doorato inaad ka qayb qaadato, waxaa jira dhacdooyin kala duwan oo aad ka qayb qaadan karto oo ku jira:

Fiirinta miisaaniyada iyo arimaha maali-gelinta

Horumarinta howlaha barnaamijka deegaanka

Horumarinta iyo fiirinta nidaamka howl fulinta deegaamada daran oo ku jira maalgelinta, dayactirada, kireynta, akhlaaqda lidka ku bulshada iyo kala duwanaanta midnaanta

samaynta, fiirinta iyo dibueegida heerarka adeegyadeena iyo xaqiijinta in heerarkani la fuliyey

cayimida waxa tegi doono qandaraasyada cusub

la imaatinka habooyin cusub ee dadka ay ka qayb qaadan karaan.

Jaantusyada soo socda waxay muujinaysaa habooyin kala duwan ee aad ka qayb qaadan karto iyo waqtiga balanqaadka midkasta looga baahan yahay.

Fursadaha Ka qayb qaadashada	Waxa ay sameynayaan	Heerka balanqaadka
Degane xubin guddi	Guddiga waxay u sameeyaan go'aamo iyo qorshooyin Northwards, waxay sameysaa ujeedooyinkeeda iyo bartilmaameed waxayna xaqiijiyaan in shaqaalaha ay fulinayaan heerarka adeega iyo horumatinta.	Waxayn kulmaan bilkasta. Xubnaha waxaa looga baahan yahay inay akhriyaan dokumentiga ogaanshahooda arimaha guriyeynta inay cusbooneysiiyaan. Guddiga deganeyaasha sidoo kale waxaa looga doonaya inay ka qaybgalaan tababr haddana matalaan sida danjiraha ururka; iyo sidoo kale ka qayb galaan

kulamada guddi hoosaadka.

Fursadaha ka qayb qaadashada	Waxa ay samaynayaan	Heerka balanqaadka
Xubinta Guddi-hoosaadka	Guddi-hoosaadka waxay si faahfaahin dheerad u fiiriyaan arimaha ugu muhiimsan ka dib waxay talooyin ujeediyaan guddiga.	Kulanka bilkasta. Sameeyaan xubno guddi. Waxay sidkoo kale doorsan karaan xubno ka socda bulshada (guddi-hoosaad kasta ilaa labo waqti kasta).
Guddiga deegaanka	waxay tixgeliyaan howl fulinta Northwards ee heer deegaaneed waxayna guddiga u soo jeediyaan arimaha ku saabsan arimo kala duwan.	Kulanka bilkasta. Xubnaha waxaa looga doonaya inay aqriyaan dokumentiga si ay ogaanshahooda arimaha guriyeynta cusbooneysiiyaan.
Kooxda Fulinta Adeegyada Maamulka	Waxay tixgeliyaan arimo kala duwan ee adeegyada horumatinta.	Kulmaan labo bil kasta. Xubanaha waxaa laga yaabaa sidoo kale inay u baahdaan inay ka qayb galaan tababaro.
Kooxda Fulinta Barnaamijka Horumarinta Dayactirada	Waxaa fiiriyaan adeegyada dayactirada iyo barnaamijka horumarinta. Waxay fiirisaa inay horumariso haddana wanaajiso adeega.	Kulmaan labo bil kasta. Xubnaha waxaa laga yaabaa sidoo kale inay u baahdaan inay ka qayb galaan tababaro.
Kooxda Fulinta Kaladuwanaanta iyo Sinaanta	Tixgeliyaan sida sinaanta iyo arimaha kala duwanaanta ay saameyso adeegyada la bixiyey.	Kulmaan labo bil kasta. Xubnaha waxaa laga yaabaa sidoo kale inay u baahdaaan inay ka qayb galaan tababaro.
Kooxda Fulinta Isgaarsiinta	Waxay fiirisaa sidii ay ku horumariso haddna wanaajiso isgaarsiinta u dhaxeea Guriyeynta Norwardhs iyo	deganeyaasha.

Kulmaan labo bil kasta. Xubnaha waxaa laga yaabaa sidoo kale inay u baahdaan inay ka qayb galaan tababaro.

Fursadaha ka qayb qaadashada	**Waxay samayn doonaan**	**Heerka balanqaadka**
Kooxda Fulinta Ka qayb qaadashada	Waxay tixgeliyaan sida dheeraadka ee deganeyaasha ka qayb qaataan haddana waxay eegaan adeega ka qayb qaadashada.	Kulmaan labo bil kasta. Xubnaha waxaa lagaa yaabaa sidoo kale inay u baahdaan inay ka qayb galaan tababaro.
Kooxaha deganeyaasha iyo kireystayaasha	Kooxo howlgala heer deegaaneed si ay deegaanka u horumariyaan.	Kooxo waxay go'aansadaan sida ay isu kulmaan caadi ahaan bishii hal mar. xubnaha waxaa laga yaabaa sidoo kale in looga baahdo inay talaabo qaadaan inta u dhaxaysa kulamada si ay horumar ku gaaraan arimo gaar ahaaneed.
Kooxaha xiriirka	Kooxo aan rasmi ahayn oo Bixiya warbixin deeganeed laakiin aan si rasmi ahaan u dhisneyn sida kooxaha deganeyaasha iyo kireysteh	Koox kasta waxay go'aan gaarta sida ay ku kulmaan. Waxay noqon noqon kartaa caadi ahaan laakiin ay noqon karto oo keliya kulamo fursad ahaan oo ku saabsan arimo gaar ahaaneed.
Kormeerey aasha Northwards	Koox deganeyaal oo mas'uul ka ah kormeerida adeegyada ay bixiso Guriyeynta Northwards. Waxay eegan khadka hore ee adeegyada haddna sidoo kale talo ka soo jeediyaan kormeekooda.	Waxaa laga filaya inay bishii hal mar kormeer sameeyaan iyadoo ay ku xiran tahay qof kasta balanqaadkiisa. Waxay ka qayb galaan Tababro marka loo baahdo.
Adeegayaal xirfad leh	Deganeyaal tusaale oo qiimeeya adeegyada ay bixiyaan Guryeynta Norrthwards. La xariir telefoon, onlaaynka, warqad ama shakhsi ahaan.	Waxay bixiyaan qaab warcelin oo ay noogu soo sheegaan sida aynu samaynay markii aan la kulanay. Waxaa laga yaabaa inay tababar u baahnaadaan.

Fursadaha ka qayb qaadashada	Waxay samayn doonaan	Heerka balanqaadka
Kooxaha wax eegida	Deganeyaal tusaale, laga codsaday inay kulmaan si ay ka doodaan adeega ay heleen iyo sida ay dareensan yihiin habka lagu wanaajin karo. Waxay caadi ahaan eegi doonaan hal mowduuc oo gaar ahaaneed – tusaale ahaan adeega dayactirka.	Caadi ahaan hal kulan oo qaadata ilaa laba saacadood.
Fagaaraha deganeyaasha: Guryaha la daryeelo saraha waaweyn Kooxaha tirada yar iyo dadka madow	Deganeyaal xiiso gaar leh ooay ku kulmaan inay ku doodaan adeega ay helaan iyo sida loo wanaajin lahaa.	Sadexdii bil mar – ayagoo aqriyeen qaar warbixin kulanka ka hor iyo ka dib.
fagaaraha Shatihaayeyaysha	Dood arimaha saameeya shatihaaye yaasha.	Kulmaan labo bil kasta. Xubnaha waxaa laga yaabaa in ay u baahdaan inay tababa ka qayb galaan
Socodyada Deegaanka	Deganeyaasha waxay la kulmaan shaqaale deegaaneed haddana waxay ku wareegaan xaafada si ay ku ogaadaan dhibaato kasta ama arin kasta.	Deegaan kasta way kala duwan yihiin.
Faalobixinta degane shakhsiyad ahaan	Kala sheekeynta weji ka weji xubin shaqaale, telfefoonwicin, ama qorid ra'yigaaga ama isticmaalida websaaydkeena	Dhacdo mar keliya ee waqtiga aad dooratay.
Sahamis	Northwards waxaa laga yabaa fursad ahaan inay kaa cosato inaad	

xiyso sahamis si ay ra'yigaaga hesho.	Sahamis caadi ahaan waxay qaadataa 10 daqiiqadood inaad buuxiso gurigana waa lagu samayn kara waqtiga aad jeclaato.

Fursadaha qayb qaadashada	Waxay samayn doonaan	Heerka balanqaadka
Ururada maamulka kireystaha	Deganeyaasha iskood adeega guryeynta u maamula.	Waxaa looga baahan yahay balanqaad sare, sida kireyste ahaan waxay mas'uul ka yihiin bixinta adeega. Caadi ahaan Waxay lug ku leedahay saddex sano ee barnaamij horumarin iyo kadib ka qayb gelid guddiga maamulka.

Hadii aad dooneysid warbixin dheraad ee arin kasta kor ku xusan ama aad dooneyso inaad ogaato sida aad ka qayb qaadan kartid, fadlan la xariir Kooxda Ka qayb qaadashada Deganaha **0161 227 3040.**

Dacwo samayn

Waxaynu go'aansanay inaanu dhamaan kiliyentaheena siino adeeg heer sare, waxaan jeclaan lahayn inaad noo sheegto markaad dareento in adeegeena aysan si ku filan u wanaaagsanayn. Nidaamka dacwo samaynta waxaa loo qaabeeyey inay naga taageerto inaad noo sheegto marka ay qaladaad dhacdo, waxayna na siineysaa macluumaadka aynu u baahanahay inaanu wax wanaajino.

Haddii aad dooneysi inaad dacwo samayso waxaa jira tilmaamo bixiye cadaysan ee talaabo talaabo ah sida aad arintani ku samyso.

Arintani waxaa laga hela websaydka Northwards' website, ama warqad ka soo qaado xafiiska xaafadaada. Waxaad sidoo kale la xariirin kartaa Kooxda Ka qayb qaadashada Deganaha **0161 227 3040.**

Gaaritaanka qof kasta

Northwards waxay balan qaaday inay dhiirigeliso ka qayb qaadashada ka socda dhamaan qaybaha jaaliyada iyadoon eegin jinsiga, cunsuriyada, diinta da'da, naafonimada ama heerka jinsiga. Waxaynu si dheraad ah fiirin doona ikhtiyaarooyinkeena ka qayb qaadashada si aanu xaqiijino inaynu fulinay baahida jaaliyada kala duwan ee aan la shaqeeyno.

Tenant management organisations (TMOs)

Kooxo qaar ayaa waxay jeclaan lahaayeen

inay maamulka guryahooda ay iskood u samaystaan. Kooxahani waxaa loo yaqaana sida ururada maamulka.

Kooxaha deganeyaasha iyo kireysteyaasha (TRGs)

Guriyeynta Northwards waxay aqoonsataa waajibka muhiimka ee kooxaha deganeyaasha iyo kireysteyaasha doorka ay ka ciyaaraan jaaliyadooda anaguna waxaynu bixinaa talo, taageer iyo tababar iyo sidoo kale deeq maalgelin.

Fiirinta iyo qiyaasinta howlfulinta

Waxaynu dooneysaa inaynu xaqiijino in Heshiiska Ka qayb qaadashada Deganaha ay fuliso baahidaada iyo inay bixiso waxa ay tiri inay bixin doonto. Si aan arintani u samayno Kooxda Fulinta Ka qayb qaadashada Deganaha waxay kulmaan labo bil kasta si ay kala hadlaan haddana ay fiiriyaan heshiiska.

Waxaynu si dheeraad ah:

- aynu samayn doonaa sahamis kiliyente ugu yaraan saddex sano
- waxay is barbardhigeynaa adeega iyo ururo kale ee heerkooda howlfulinta ay sareyso haddana aynu kuwo kale wax ka barano
- anagoo si joogto ah nala jira Kooxda Fulinta Ka qayb qaadashada Deganaha si aynu fiirino saamaynta ay lahaato ka khiyaarka ka qayb qaadashadaada
- booqashada kooxaha kireysteyaasha iyo deganaha sanad kasta si dib loo eego baahida taageerkooda iyo xaqiijinta heeraka lagu heshiiyey in la fuliyey
- isticmaalka dacwooyinka kiliyenteyaasha iyo faalooyinka si loo fiiriyo raaligelinta heshiiska
- si buuxda dib loo eego saddex bil kasta.

Kooxda Fulinta Ka qayb qaadashada Deganaha sidkoo waxay bixin doontaa qorsho waxqabad si ay la socoto Heshiiskan Ka qayb qaadashada Deganaha. Waxaa arintan ka heli kartaa websaayda Northwards ama la xariir Kooxda Ka qayb qaadashada Deganeyaasha

0161 227 3040.

Xiriirin Aasaasiga

Northwards Housing
0161 953 2662
Dhamaan weydiimaha guriyeynta – oo ku jira kirada, dayactirka, akhlaaqda lidka ku ah bulshada iyo arimoha kasta kale oo la xarira kireystaha.

Northwards Resident Involvement Team
0161 227 3040
Waxay la mucaamishaa weydiimo kasta ku saabsan ka qayb qaadashada deganaha, oo ku jira taageer kooxaha deganeyaasha iyo kireysteyaasha, samaynta inaad ka qayb gasho kulamada guddiga deegaanka, iyo taageer dadka shakhsiyad ahaan u baahan inay si dheeraad ah ka qayb qaataan.

Manchester Residents Association
0161 238 4920
Urur mutadawic oo bixiya talo iyo taageer haddana taageera ururada deganeyaasha iyo kireysteyaasha.

T8240-Somali Resident involment summary